

**XEERKA n. 163. rep.**

**MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMALIYA**

**MAAREEYAHA**

MARKI UU ARKAY Wareegtada Madaxweynaha Jamhuuriyadda 9-12 -1952, n. 2357;

MARKI UU ARKAY amarka Maareeyaha n. 9 ee soo baxay 18kii jannayo 1952 kaas oo ansixinaya nadaamka waxbarashada iyo maamulka Dugsiga diyaarinta Siyaasadda iyo Maamulka ee Soomaliya;

MARKI UU ARKAY Amarka Maareeyaha n. 120 sona baxday 10 agoosto 1952 taas oo waxoogaa isbeddel ah ku sameysa Sharciga la soo sheegay;

MARKI UU TIXGELIYEY fursadda ah in wax dheeri ah laga beddelo nadaamka Dugsiga diyaarinta Siyaasadda iyo Maamulka;

MARKI UU DHGEYSTAY Golaha dhexe ee Dugsiyada ee kalfadhigii 2-10-1953;

**WUXUU XEEREYAY:**

**Qod. 1.**

Inta u dhexeysa qaybta 2aad iyo qaybta 3aad ee nidaamka waxbaridda iyo maamulista Dugsiga diyaarinta Siyaasadda iyo Maamulka ee lagu ansixiyey amar Maareeye n. 9 ee soo baxay 18 jannayo 1952, waxa lagu daray qodobka 2 mar labaad:

“Kuwa weydiisanayo in lagu qoro dowrada kasta, waa in ay la yimaadaan, shan iyo tobanka maalim ee ugu horeysa gudohooda, billowga sannad dugsiyeedka dalabka ku qoridda oo ah warqad sharciiyeysan loona gudbiyo Maamulka Digsiga”.

**Qod. 2.**

Qodobka 3aad ee Nadaamka lagu xusay qodobka 1aad ee wareegtadaan waxa wax looga beddelay sida soo socota:

Dugsiga waxa uu qaadanaa seddax dowro sannadkii oo midwalba socon todobo bilood, taas oo casharada soo socda lagu baro:

- a) sheekooyinka ilbaxnimada ee dowradaha 1aad, 2aad & 3aad (laba saac waxbarid usbuucii, 1aad iyo 2aad, afar saacadood usbuucii dowrada 3aad).
- b) qaanuunka guud dowradah 1aad, 2aad & 3aad ( laba saacadood dowrad walba usbuucii).
- c) qaanuunka caalamiga iyo nadaamka Golaha loo dhan yahay, dowrada 1aad, 2aad & 3aad, (hal saac usbuucii dowrad kasta).
- d) hay'adaha islaamka, dowradaha 1aad, 2aad, & 3aad (laba saacadood usbuucii dowradaha 1aad & 2aad, iyo hal saac usbuuciiba dowrada 3aad).
- e) fikradaha qanuunka gaarka ah, dowrada 1aad & 2aad (laba saacadood usbuuciiba midwalba).
- f) fikradaha qaanuunka ciqaabta, dowrada 3aad (laba saacadood usbuucii).
- g) fikradaga syaasadda dhaqaalaha, dowrada 2aad (hal saac usbuucii).

- h) fikradaha cilmiga dhaqaalaha, xisaabaadka iyo isla xisaabtanka guud ee dowladda, dowlada 2aad & 3aad (laba saacood usbuucii midwalba).
- i) Fikradaha qaanuunka gaarka ah, dowlada 3aad (laba saacood usbuucii).
- j) Joqoraafiyada siyaadda iyo dhaqaalaha iyada oo si gaar ah loo eegayao Afrika, dowlada 3aad (laba saacood usbuucii).

Casharro dheeri ah:

- a) naxwaha talyaaniga, dowlada 1aad, (seddax saacood usbuucii) dowlada 2aad (laba saacood usbuucii).
- b) naxwaha carabiga dowlada 1aad saddex saacood usbuucii) dowlada 2aad (laba saacood usbuucii).
- c) xisaabaadka, dowlada 1aad (laba saacood usbuucii) dowlada 2aad (hal saac usbuucii).
- d) cilmiga jirka iyo dabiicadda, dowladda 3aad (laba saacood usbuucii).
- e) juquraafiga guud, dowlada 1aad (hal saac usbuucii).

### **Qod. 3.**

Inta u dhexeysa qaybta 3 iyo qaybta 4 ee nadaamka lagu sheegay qodobka 1aad ee wareegtadaan waxa la dhexgeliyaa qodobka soosocda 3 mar labaad.

“Ardayda waxa qasab ku ah in ay immadidda dhammaan casharrada.

Isla dowrad lama xaadiri karo wax ka badna laba sano. Ardayda ka maqnaada casharrada in ka badan sedaxmeelood hal meel ee hal dowro waxa laga reebaa in ay ka qaybgalaan imtixaannada.

Kuwa maqnaanshohoodu ku yimaado sababo awooddooda ka baxsan, macallimiinta Dugsigu waxa ay awoodaan go’aan la sababeeyay in ay ku burriyaan qannuka kor ku xusan.

### **Qod. 4.**

Waxa la tirtiray faqrada ugu dambaysa qodobka 7 ee nadaamka lagu sheegay qodobka 1 ee amarkan.

### **Qod. 5.**

Qodobka 9 ee nadaamka lagu sheegay qodobka 1 ee amarkan ayaa wax laga beddelay sida soo socoto;

Casharrada waxaa bixiya macallimiinta uu magacaabay Maamulaha wakhti kasta.

Maamulaha dugsiga ayaa saadaalin kara markii duruufaha loogu baahdo in uu magacaabo beddelka macallimiin wax ku oolka ah. "Macallimiinta bedelku kama badan karaan muddada laba bilood ah. Xaddiga lacagta macallimiinta ayaa la mid noqon doona kii lagu asaasay xeerarkii hore ee macallimiinta beddelka ah."

### **Qod. 6.**

Faqrada koowaad ee qodobka 11 ee nadaamka uu qabo qodobka 1 ee amarkan ayaa looga beddelay sida soo socota:

Maamulaha Dugsiga waxa XEER ku magacaaba Maareeyaha.

### Qod. 7.

Qodobka 13-aad ee Xeerka lagu xusay qodobka 1-aad ee wareegtadan waxaa lagu badalay qoraalka soo socda:

"Wareegtada magacaabista Agaasimuhu wuxuu dejinayaa: muddada meelaynta, xaddiga mushaharka billaha ah iyo wixii ajuuro ah ee ciidaha iyo safarrada ah.

Haddii agaasimuhu yahay shaqaale ka tirsan Maamulka, wuxuu xaq u yeelan doonaa mushaar shaqaale ee ku xiran darajadiisa ".

Mushaharka aasaasiga ah ka sokow, Agaasimuhu xaq uma laha wax gunno ah oo kale waxbaridda awgeed, iyo ka qaybgalka imtixaanada ama waxqabadyada kale ee anfaca Dugsiga.

Muqdisho, 25 oktoobar 1953.

MAAREEYE  
**E. Martino**

Arkay diiwaangelinta n. 182 R. D.  
30 ki okroobar 1953.

---